



Halbeegyada Adeega La wadaago

Shared Utility Meters

Waa maxay halbeega adeega la wadaago?

Halbeega adeegani wuxuu qiyaasaa inta koronto, gaas, iyo biyo la isticmaalay. Halbeega la wadaagaa waa hal halbeeg kaasoo qiyaasa inta halkii guri uu isticmaalay iyo qayb guriga ka baxsan. Qaybtaas guriga ka baxsan waxay kumid noqon kartaa guriga dariska ah, ama salootada darisku wadaago.

Tusaalaha halbeegayada la wadaagaa waa marka hal halbeeg uu ka dhaxeeyo laba guri ama uu hal guri iyo saalooto ay wadaagaan inka badan hal guri. Haddii aadan hubin inaad halbeeg la wadaagto guri kale, waxaad waydiin kartaa shirkada adeega si ay kuugu sheegto.

Waa maxay xeerka halbeeg la wadaago?

Sharciga Minnesota wuxuu dhigayaa in qofka guriga iska lehi bixiyo kharashka halbeega la wadaago.

Kharashka halbeega la wadaagaa waa inuusan ku qornayn magaca kan kiraystay guriga, marka laga reebo hal xaalad. Haddii halbeegu qiyaasa korontada gurigaaga uu sidoo kale qiyaaso koronto yar oo ku baxday gurigaaga banaankiisa, Koontadaa magacaaga waa lagu qori karaa. Korontadan yari waxay noqonaysaa wax u dhigma labo nal salooto koronto ku baxday. Xeerkani wuxuu quseeyaa isticmaalka korontada oo kaliya, mana adeegyada kale, sida gaaska dabeeciga ah.



Ma aha inaad u dirto shirkada adeega kharaska koonto uu ku qoronyahay qofka guriga iska leh, xataa haddii koontada halbeeggedu yahay mid la wadaago.

Laakiin, haddii qofka guriga iska lehi bixin waayo kharashka adeega oo shirkada adeegu ku hanjabto inay goynayso, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad qayb bixiso kharashka si aan adeega lagaaga goynin. Hadday tani dhacdo, waxaad ka goyn kartaa kirada bisha xigta intii aad bixisay (fiiri hoos – Kawaran haddii qofka guriga iska leh uusan bixinin lana soo dhajiyay warqadii lagu goyn lahaa adeega?) Wac shirkada adeega haddii aad u malaynaysid inaad bixinaysid kharashka adeeg la wadaago.

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo laga yaabo inaad u bixiso kharashka qaybtaada adeega halbeegiisa la wadaago. Heshiiska kiraynta guriga waxaa lagu dari karaa kharashka adeega kan kirada guriga, ama waxaa lagu waydiin karaa inaad qaybtaad bixiso kharashka adeega halbeegiisa la wadaago oo aad siiso qofka guriga iska leh isaga oo gaar ka ah kharashka kirada guriga.

Haddii uu heshiiskaagu dhahayo waa inaad siisaa qofka guriga iska leh kharashka adeega halbeegiisa la wadaago isaga oo gaar ka ah kharashka kirada guriga, waxaa jira xeerar.

- Markaad codsatid maqsin adeeg la wadaago leh, waa inuu qofka guriga iska lehi kusiiyaa warqad cadaynaysa kharashka adeega ee guriga oo dhan. Warqada waa inay ku qoran tahay kharashka adeega 12 bilood ee sanadkii u dambeeyay oo bil bil ah.

- Waa inuu jiraa heshiis qoran oo ka mid ah heshiiska kirada kaas oo si xaq idiinku qaybinaya kharashka adeega adiga iyo shaqsigii kale ee isticmaalaya adeega halbeegiisa la wadaago.

- Waa inay heshiikaaga ku qorantahay, **hadii aad dalbato**, qofka aad guriga ka kiraysatay waa inuu kusiiyaa kobiga kharashka adeega guriga oo dhan iyo kobiga kharashka maqsin walba qayb ugu aaday.



- **Hadii aad dalbato**, qofka guriga kaa kireeyay waa inuu kusiiyaa warqada kharashkii adeega guriga oo dhan intii aad daganayd gurigiisa iyo kharashka guri walba qayb ahaan ugu aaday.
- Hadii uu heshiiska kirada gurigu tahay hal sano am kabadan, adiga iyo qofka guriga kaa kireeyay waxaad ku heshiin kartaan qorshaha kharashka kirada guriga. Waxaad bixin kartaa kiro bil bil ah si isla'eg sanadka oo idil. Kharashka waxaa lagu saleeyay qiyaasta kharashka kirada ee sanadka oo idil.
- Ugu dambayn 30 bisha September 30 sanad kasta, qofka guriga kaa kireeyay waa inuu qoraal kugu siiyaa xogta barnaamijka caawinaada quwada korontada. Qoraalkaas waa inuu ku qoran yahay lambarka teleefanka hay'ada caawinaada quwada korontada bixisaa.

Hadii qofka guriga kaa kireeyay uu raaci waayo xeerarka kor ku qoran, qasab kuma aha inaad bixiso kharashka adeega ama anaad u celiso kharashka adeega ee uu isagu bixiyaay.

Kawaran hadii aan bixinayo kharashka adeeg halbeegiisa la wadaago, laakin aysan ahayn in la wadaago?

Hadii halbeega adeegaagu yahay mid la wadaago, biilka adeegana magacaagu ku qoran yahay, waa inuu qofka guriga kaa kireeyay bixiyaa kharashka adeega. Si aad u saxdo qaladkan, markaaba wac shirkada adeega oo usheeg. Wacwo maxkamadeed ayaad la aadi kartaa qofka guriga kaa kireeyay si kharashkii kaa baxay uu kuugu celiyo. Dacwada waxaad ku sheegan kartaa ganeex \$500 ama 3 jeer laab waxaad bixisay, marba kii badan. Waxaa kale oo aad xaakimka ka codsan kartaa in qofka guriga kaa kireeyay uu la wareego masuuliyada bixinta kharashka adeega.


Dacwada maxkamadeeda kirada ee Escrow Action loo yaqaan ayaad kula tacaali karta dhibaataada adeega halbeegiisa la wadaago. Ugu yaraan 15 cisho kahor inta aadan kiiska maxkamada gaynin, waa inaad qofka guriga kaa kireeyay aad siisaa ogaysis qoraal ah oo aad ku ogaysiinayso halbeega la wadaago iyo inta aad bixisay. Kobi kareebo ogaysiska aad siisay qofka kaa kireeyay guriga. Waxaa kale oo aad ka codsan kartaa inay ogaysiiyaan qofka guriga kaa kireeyay shirkada quwada korontada iyo kuwa quryaha baara. Kuwa quryaha baara markay ogaysiiyaan qofka guriga kaa kireeyay waxay siin

doonaan mudo. Haddii ay mudadu dhaafto, waxaad dacwo maxkamadeedka Kirada ee Escrow Action ayaad xarayn kartaa. Hadaad doonaysid xog dheeri ah oo ku saabsan Rent Escrow Action, arag warqadan magaceedu yahay, [Ka Helida laga helayo in Qofka guriga lehi uu Hagaajiyo wixii Halaaba.](#)

Ka waran haddii qofka guriga iga kireeyay uusan bixinin oo lasoo dhajiyo ogaysioska goynta?

Haddii lasoo dhajiyo warqada goynta adeega inuusan gofki guriga kaa kireeyay bixinin kharashka adeega, waxaad codsan kartaa gargaarka degdega ah ee loo yaqaano If a utility shut-off notice is posted because of an overdue bill that the landlord has not paid emergency relief action. Waxaa kale oo loo yaqaanaa emergency tenant remedies action oo loo soo gaabiyo (ETRA). Qofka guriga kaa kireeyay ku ogaysii 24 saac gudahood dhika jira, uga sheeg inaad dacwaynaysid haddii uusan bixinin kharashka adeega. Warqadayada cadaynta, [Emergency Repair Problems](#), ayaad ka heli kartaa xog dheeraad ah.

Waxaad kale oo qofka guriga kaa kireeyay aad ku ogaysiin kartaa qoraal mudo 48 saac ah oo aad ugu sheegaysid inaad bixinaysid kharashka adeega kana goyntoontid kirada bisha. Ogaysiiska ugu dirqofka guriga kaa kireeyay warqad kana reebo warqada kobi. Kadib markaad bixisid kharashka adeega, waxaad u baahantahay inaad koobiga rasiidka aad ku bixisay qofki guriga kaa kireeyay. Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa warqadayada xogta, [Utility Shutoffs When the Landlord Owes the Bill.](#)



Ka waran haddii aan bixiyay kharashka adeega halbeegiisa la wadeego ee guri aan horay u daganaan jiray?

Haddii aad ka guurto guri aad bixisay kharashka adeeg halbeegiisa la wadaago oo ahayd inuu qofka guriga kaa kireeyay bixiyo, waxaad dacwo maxkamadeed ka furan kartaa maxkamada hatida yar. Uma baahanid qareen haddii hantida aad sheeganayso ay tahay \$15,000 ama ka yar. Haddii uu hantida kaa aad sheeganayso ka badantahay, waxaad dacwo ka furi kartaa maxkamada degmada. Fiiri warqadayada xogta [Conciliation Court.](#)

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2020 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saar o. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**